

IDRS Infectious Disease Reporting System

Disease Reporting 24 Hours a Day

Columbus Public Health and Franklin County Public Health

SHIGELLOSIS

Dhab ahaan, jeermiga *Shigella* wuxuu ka tirsan yahay qoyska bakteeriyaha ee sabab u noqon kara shubanka ku dhaca aadanaha. Waa nafley aad u yaryar oo ka gudba qof una gudba qofka kale.

Calaamadaha

Badanaa calaamadaha waxay bilowdaan 1 ilaa 4 maalin kaddib marka la liqo bakteeriyaha, waxaana ka mid ah:

- Shuban (waxaa dhici karto in uu biyo-biyo yahay ama in uu dhiig la socdo)
- Qandho
- Majuujinta caloosha
- Labbolabbo ama mottag
- Waxaa dhici karto in dadka qaar aan lagu arkin calaamado, hase ahaatee, weli waa gudbin karaan bakteeriyaha.
- Badanaa calaamadaha waxay gaaraan 5-7 maalin. Hase ahaatee, waxay qaadan kartaa dhowr bilood in qofka uu si buuxdo ugu soo noqdo caadi.
- Waxaa dhici karto in dad yar la kulmaan dhibaato sida biyo bax, qalal, ama lafo xanuun.

Sida uu u faafo?

- Bakteeriyaha *Shigella* wuxuu ka gudbaa hal qof wuxuuna u gudba qofka ku xiga, isaga oo raaca saxarada (xaarka) dadka horay u qaaday cudurka. Inta badan wuxuu faafaa marka qofka uusan si wanaagsan u dhaqin gacmahiisa/gacmaheeda kaddib marka uu ka soo baxo musqusha. Caruurta yaryar ee weli ku sugan barashada musqusha waxay faafiyaan cudurka maxaa yeelay weli ma aysan baranin sida loo ahaado nadiif.
- Dadka waa faafin karaan *Shigella* inta ay xanuunsan yahii iyo ilaa muddo hal ama labo todobaad kaddib.
- Infekshanka *Shigella* waxaa laga qaadaa cunidda raashin uu soo gaaray cudurka. Badanaa raashinka uu soo gaaro cudurka wuxuu u muuqdaa wuxuuna u uraa sida caadiga. Raashinka waxaa gaarsiin karaa gacmaha shaqaalaha raashinka ee halmaama in ay gacmaha ku dhaqaan saabuun kaddib marka ay isticmaalaan musqusha.
- Waxaa kaloo dhici karta in cudurka soo gaaro ilaha raashinka iyo biyaha haddii loo dhaweeyo wasakhda xambaarsan *Shigella* ama taxsiga.

Baaritaanka iyo Daweynta

- Shaybaarka wuxuu cad saxaro ah ka baari karaa *Shigella*.
- Dadka qaba cudurka qabooban waxay badanaa u bogsadaan si degdeg ah iyaga oo aan qaadanin daawada antibiyootikada. Hase ahaatee, daweynta antibiyootikada ku habboon waxay dishaa bakteeriyaha *Shigella*, waxayna soo gaabin kartaa xanuunka ilaa dhowr maalmood.
- Ha isticmaalin dawooyin sida Imodium ama Lomotil si aad uga hortagtid shubanka. Waa ka sii darri karaan xanuunka.

Ka Hortagga

- Si wanaagsan isaga dhaq gacmaha adiga oo isticmaala saabuun iyo biyo mar KASTA aad isticmaashid musqusha ama aad baddashid xafaayadda cunugga. Waalidiinta iyo macalimiinta waa in ay fiiriyaan marka caruurta iska dhaqaan gacmaha si loo habsado in ay si wanaagsan isaga dhaqaan.
- Dadka qaba *Shigella* waa in aysan dadka kale u diyaarinin raashin ama cabbitaan.
- Dhaq dhamaan fruttada iyo khudaarta ka hor inta aadan cunin.
- Haddii aad safar ku tagtid waddamada soo koraaya, cab biyaha la nadiifiyay, la karkariyay, ama biyaha ku jiro dhalada, iyo waxaad cuntaa raashinka lagu kariyay kuleelka oo keliya ama fruttada aad adiga fiiqidid.

Macluumaad Dheeraad ah

Shaqaalaha adeegga raashina, shaqaalaha daryeelka cunugga, caruurta tagta xanaanada cunugga, iyo bixiyeyaasha daryeelka bukaanka waa in ay ka fogadaan hawlhooda caadiga ilaa ay ka soo dhamaystaan ugu yaraan 5 maalin daweynta antibiyootikada ku habboon, iyo 2 cad oo saxaro ah ka muujiyaan in aysan qabin *Shigella*.

Dhamaan macluumaadka waa guud mana loogu talogalin in loo isticmaalo in lagu baddalo waanada qofka aqoonta leh.



c/o Franklin County Public Health, 280 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215-4562

Call: (614) 525-8888 • After Hours: (614) 525-3965 • Fax: (614) 525-8890

Email: idsr@franklincountyohio.gov • Web: www.idrsinfo.org

